Xaashida Macluumaadka Ka qeybgalka

Caddaynta Sinnaanta Qaranka Sahanka (EVENS): Diiwaangelinta Nolosha Qoomiyadaha iyo Diinta laga tirada badan yahay ee ku jira Xilliga Dhibaatada

Xaashida Macluumaadka Kaqeybgalaha

Waxaa lagugu martiqaadayaa inaad kaqeybqaadato Caddaynta Sinnaanta Sahaminta Qaranka (EVENS). Kahor intaadan go'aansan inaad ka qeybqaadato, waxaa muhiim kuu ah inaad fahanto sababta cilmi baarista loo sameynayo iyo waxa ay ku lug yeelan doonto. Fadlan si taxaddar leh u aqriso macluumaadka soo socda ka hor intaadan kaqeyb qaadan oo xur baad u tahay inaad dadka kale kala hadasho haddii aad rabto. Haddii aad jeclaan lahayd macluumaad dheeri ah ama caddeyn dheeraad ahi, fadlan la xiriir. Waad ku mahadsantahay waqtiga aad siisay inaad tani aqriso.

Ayaa sameyn doona cilmi baarista?

Cilmi-baarista waxaa sameyn doona Ipsos MORI oo wakiil ka ah cilmi-baarayaasha Jaamacadda Manchester, Jaamacadda St Andrews iyo Jaamacadda Sussex.

Waa maxay ujeedada cilmi baaristu?

Waxaan dooneynaa inaan ogaanno sida cudurka faafa ee Covid-19 iyo xirxiradu u saameynayaan dadka laga tirada badan yahay ee ku nool England, Iskotland iyo Wales. Waxaan ku weydiin doonaa sida qaybaha kala duwan ee noloshaada ay u saameeyeen tusaale; waxbarashada, shaqada iyo ladnaanta dhaqaalaha, guryaha, bulshada, kaqeybgalka siyaasada, caafimaadka, iyo khibradaha cunsuriyada iyo takoorka.

Maxaa la iigu doortay inaan ka qaybqaato?

Waxaan xiiseyneynaa inaan wax ka barano khibradahaaga cudurka faafa ee Covid-19. Waxaan si gaar ah u danaynaynaa diiwaangelinta khibradaha qowmiyadaha iyo diinta laga tirada badan yahay. Sahankan waxaa sidoo kale la weydiinayaa dadweynaha guud si aan u fahmi karno aragtida kooxaha kala duwan ee dadka.

Natiijooyinka cilmi-baarista ma la baahin doonaa?

Natiijooyinka daraasadda waxaa lagu baahin doonaa bogga daraasadda ee www.ethnicity.ac.uk/evensurvey iyo kanaalladayada warbaahinta bulshada ee @EVENSurvey (Twitter) iyo @evensurvey (Instagram). Natiijooyinka sahaminta ayaa la daabici doonaa oo lala wadaagi doonaa isticmaaleyaasha tacliinta iyada oo loo marayo waraaqaha shaqada ee internetka, maqaallada joornaalada dib loo eegay, tifaftirka, joornaalada, seminaaro, iyo bandhigyada shirarka. Waxaan sidoo kale baahin doonnaa xog siyaasadeed kooban, maqaallo warbaahineed iyo qoraallo la diwaangeliyey oo ku saleysan natiijooyinka sahanka. Waxaan la wadaagi doonnaa natiijooyinka dadweynaha iyada oo loo marayo aqoon isweydaarsiyo, cododka digitaalka, iyo fiidiyowyo.

Ayaa dib u eegay mashruuca cilmi baarista?

Mashruucan waxaa ansixiyay Guddiga Anshaxa Cilmi-baarista ee Jaamacadda Manchester [2021-10455-17768].

Ayaa maalgelinaya mashruuca cilmi baarista?

Sahankan waxaa maalgeliyey Golaha Cilmi-baarista Dhaqaalaha iyo Bulshada (ESRC).

Maxaan la i weydiin lahaa inaan sameeyo haddii aan ka qayb qaato?

Marka hore waxaa lagu weydiin doonaa dhowr su'aalood oo ku saabsan sahan diiwaangelin gaaban si loo hubiyo inay habboon tahay inaad ka qeybqaadato sahanka guud. Haddii aad xaq u leedahay, waxaa lagu weydiin doonaa inaad ka qeybqaadato sahan 30-daqiiqo ah oo khadka tooska ah ama, haddii aad doorbideyso, wareysi taleefan oo 40 daqiiqo ah oo ku saabsan khibradaada intii lagu jiray cudurka Covid-19.

Magdhow miyaa lay siinayaa?

Haddii ay habboon tahay inaad gasho sahanka guud oo aad sii waddo ilaa dhammaatkiisa , waxaad heli doontaa foojar hadiyad oo ah inaad dhammaystirtay sahanka.

Maxaa dhacaya haddii aanan doonayn inaan ka qayb qaato ama haddii aan maankayga beddelo?

Adiga ayay kuu taalaa go’aanka in aad kaqaybqaadato iyo inkale. Haddii aad go'aansato inaad kaqeybqaadato, waxaad awood u yeelan doontaa inaad ka eegto xaashidan macluumaadka khadka tooska ah adigoo ka helayo bogga macluumaadka IpsosMORI(evenssurveyinfo.ipsos-mori.com). Waxaa lagu weydiin doonaa inaad bixiso ogolaanshahaaga si aad uga qayb gasho khadka tooska ah ama taleefoonka (haddii aad ku qayb gasho taleefanka, Ipsos MORI ayaa si buuxda kuugu akhrin doonta warqaddan macluumaadka haddii aad u baahatid). Hadaad go' aansato inaad kaqeyb gasho, wali xor baad u tahay inaad ka baxdo waqti kasta adigoon sabab siineyn naftaadana wax u dhimin. Tani saameyn kuma yeelanayso xuquuqdaada ilaalinta xogta. Haddii aad go'aansato inaadan ka qaybqaadan, uma baahnid inaad wax intaa ka badan qabato.

Macluumaad noocee ah ayaad iga aruurin doontaan?

Si looga qaybqaato mashruucan cilmi baarista, Ipsos MORI waxay ku weydiin doontaa macluumaad lagugu aqoonsan karo, oo loo yaqaan "macluumaad aqoonsi shaqsiyeed". Gaar ahaan, waxaa lagu weydiin doonaa jinsigaaga, da'daada, qowmiyadaada, diintaada, xaaladaada guurka, nooca galmada, wadanka aad ku dhalatay iyo lambarka boostada.

Dhamaadka sahanka Ipsos MORI sidoo kale waxay ku waydiin doontaa, ogolaanshahaaga, faahfaahinta xiriirkaaga si aan kuugu soo diro foojarka hadiyadaha iyo, markale ogolaanshahaaga, inaad nala wadaagto faahfaahinta xiriirka (Jaamacada Manchester) si ay nogu suurogasho inaan kugu martiqaadno inaad kaqeybqaadato daraasadaha mustaqbalka emayl ahaan, boostada ama fariin qoraal ah.

Maxay aasaas sharciga ah ee aad ku ururinaysaa macluumaadkan?

Jaamacadda Manchester iyo Ipsos MORI ayaa aruurinaya oo keydin doona macluumaadkan la aqoonsan karo iyadoo la raacayo sharciga ilaalinta xogta ee ilaalinaysa xuquuqdaada. Taasoo sheegayso inaan lahaano aasaas sharci ah (sabab gaar ah) aruurinta xogtaada. Daraasaddan, sababta gaarka ah ee Ipsos MORI ay u aruurinayso xogta waa "oggolaanshaha ka-qaybgalka cilmi-baarista" iyo "oggolaanshaha in xogtaada loo gudbiyo Jaamacadda Manchester". Marka Jaamacadda Manchester

ay falanqeyneyso xogta sababta gaarka ah waa inay tahay "hawl dan guud ah" iyo "hawl lagama maarmaan u ah ujeedooyin cilmi baaris".

Maxay yihiin xuquuqdeyda la xiriirta macluumaadka aad iga aruurin doontaan?

Waxaad leedahay xuquuqo dhowr ah oo hoos timaada sharciga ilaalinta xogta ee ku saabsan macluumaadkaaga shaqsiyeed. Waxaad xaq u leedahay inaad codsato helitaanka xog shakhsiyadeedkaaga kasto, ka noqosho ogolaanshahaaga ama diidmada isticmaalka macluumaadkaaga shakhsiyeed ee ay hayaan Ipsos MORI kahor 31 Luulyo 2021 (waxay hayn doonaan xogtaada kaliya inta ay lagama maarmaanka u tahay inay gutaan kaalintoodani waxbarasho - in laguu soo diro xiriiriyeyaasha sahanka, foojarrada hadiyad iyo u wareejinta xogta Jaamacadda Manchester). Waad diidi kartaa in la isticmaalo jawaabaha sahanka ee aad bixisay wakhti kasta kahor intaan xogta laga baaraandegin oo aanay gudbin Ipsos MORI ee Jaamacadda Manchester markay tahay 17 Maajo 2021. Faahfaahinta xiriirka ay hayaan Jaamacadda Manchester waad ka noqon kartaa oggolaanshahaaga kuwan in la qabto ka hor 31-da Luulyo 2026, goorta ay burburayaan, illaa ay ka baab'iyaan si dhakhso leh haddii Jaamacadda Manchester ay go'aansato inaysan muhiim ahayn in loo haysto dhererka buuxa ee muddada haynta tusaale ahaan, haddii ay dhacdo in cilmi-baarista mustaqbalka la soo gabagabeeyo ka hor intii aan la fileynin.

Haddii aad jeclaan lahayd inaad wax badan ka ogaato xuquuqdaada kala duwan ama habka macluumaadkaaga shaqsiyeed loo adeegsan doono si loo hubiyo inaan raacno sharciga, fadlan la tasho Jaamacadda Manchester Ogeysiiska Asturnaanta ee Cilmi-baarista iyo Ogeysiiska Asturnaanta Ipsos MORI ee laga heli karo bogga macluumaadka sahanka:evenssurveyinfo.ipsos-mori.com

Ka qaybqaadashadayda daraasadda miyay noqon doontaa mid qarsoodi ah oo macluumaadka shakhsiyadeed ee la aqoonsan karo miyaa la ilaalin doonaa?

Haa. Waxa kaliya ee ka reeban ayaa ah haddii aad muujiso macluumaad aad damacsan tahay inaad waxyeello u geysato naftaada ama dadka kale; tan ayaa lagaala hadli doonaa oo ficil dheeraad ah - oo lala xiriirayo booliska, ambalaaska, ama adeegyada bulshada - ayaa laga yaabaa in loo baahdo in la qaado.

Iyadoo la raacayo sharciga ilaalinta xogta, Jaamacadda Manchester iyo Ipsos MORI ayaa ah Maamulayaasha Macluumaadka mashruucan. Tan macnaheedu waxa weeye annaga ayaa mas'uul ka ah hubinta in macluumaadkaaga shakhsi ahaaneed la xafido, lana xafido, loona isticmaalo keliya sida laguu sheegay in loo isticmaali doono. Iyada oo maanka lagu hayo sidan ayaa dhammaan cilmi-baarayaasha lagu tababaray, xogtaada waxaa lagu ilaalin doonaa hababka soo socda.

Faahfaahinta xiriiriyahaaga iyo diiwaanka oggolaanshahaaga ayaa loo kaydin doonaa si ka duwan jawaabahaaga shakhsi ahaaneed waxaana keliya oo heli kara kooxda daraasadda ee Ipsos MORI iyo cilmi baarayaal cayiman oo ka tirsan Jaamacadda Manchester. Haddii aad ogolaato inay dib kula soo xiriiraan Jaamacadda Manchester oo ku saabsan cilmi-baarista mustaqbalka ee mowduucyada la midka ah, cilmi-baarayaasha Jaamacadda waxay awoodi doonaan inay iskuxiraan faylasha si ay kuugu casuumaan inaad kaqeybqaadato. Goor kasta ha noqotee, waad codsan kartaa,in lagaa saaro keydka macluumaadka mustaqbalka.

Faahfaahinta xiriirkaaga iyo jawaabahaaga shakhsiyeed ayaa loo kaydin doonaa si gooni ah, iyadoo marka hore Ipsos MORI adeegsanayso keydkooda macluumaadka qarsoodiga ah ee sirta ah (kaliya cilmi-baarayaasha lagu magacaabay Ipsos MORI ayaa marin u heli kara xogtaada inta ay keydkooda

ku hayaan). Ipsos MORI waxay si badbaado leh u baabi'in doontaa diiwaanka ay ku hayaan faahfaahinta xiriirkaaga markii xogta loo gudbiyo cilmi baarayaasha Jaamicadda Manchester, muddo saddex bilood gudahood ah laga bilaabo dhammaadka mashruuca.

Marka faahfaahinta xiriirka iyo jawaabaha shakhsiyeed loo wareejiyo cilmi-baarayaasha Jaamicadda Manchester, waxaa si gooni ah loogu kaydin doonaa server-yada cilmi-baarista ee aadka u sugan ee jaamacadda oo lagu hayn doono illaa shan sano. Waqtigan ka dib, faahfaahinta xiriirkaaga waa la baabi'in doonaa, iyo xogta sahanka si buuxda ayaa loo qarin doonaa.

Haddii aad doorato inaad ku buuxiso xog ururinta taleefanka, wareysiga sahanka taleefanka waxaa loo duubi karaa ujeedooyin xakameyn tayo leh. Waxaa la tirtiri doonaa cajaladaha duuban ee wareysiga taleefoonka ee ay keydisay Ipsos MORI 3 bilood gudahood laga bilaabo dhamaadka muddada xog aruurinta.

Xog uruurin buuxda oo aan la magacaabin ayaa sidoo kale lagu keydin doonaa Adeegga Macluumaadka ee Boqortooyada Midowday waxaana loo heli doonaa inay adeegsadaan cilmibaareyaasha kale. Qofna awood uma yeelan doono inuu kugu aqoonsado xogtaan ama natiijooyinka ka soo baxa daraasaddan.

Fadlan sidoo kale ogow in shakhsiyaadka ka socda Jaamacadda Manchester ama hay'adaha sharciyeynta u baahan karaan inay eegaan xogta lagu soo ururiyay daraasaddan si loo hubiyo in mashruuca loo fulinayo sidii loogu talagalay. Tani waxay ku lug yeelan kartaa fiirinta xogta la aqoonsan karo. Dhammaan shakhsiyaadka ku lug leh xisaabinta iyo kormeerka daraasadda waxa saaran waajib adag inay sugaan sirtaada adigoo ka-qaybgale cilmi-baaris.

Ka waran haddii aan rabo inaan dacwo sameeyo?

Haddii aad rabto inaad cabasho u gudbiso xubnaha kooxda cilmi-baarista, fadlan la xiriir Dr. Nissa Finney(Nissa.Finney@st-andrews.ac.uk) ama Professor James Nazroo (james.nazroo@manchester.ac.uk).

Haddii aad rabto inaad cabasho rasmi ah u gudbiso qof ka madax bannaan kooxda cilmi-baarista ama haddii aadan ku qanacsanayn jawaabta aad ka heshay cilmi-baarayaasha markii ugu horreysay, markaa fadlan la xiriir:

Maamulaha Anshaxa Cilmi-baarista, Xafiiska Cilmi-baarista, Christie Building, Jaamacadda Manchester, Oxford Road, Manchester, M13 9PL, adoo email u diraya:research.complaints@manchester.ac.uk ama taleefan ahaan 0161 275 2674.

Haddii aad rabto inaad nagala soo xiriirto wixii ku saabsan xuquuqdaada ilaalinta xogta, fadlan emayl dataprotection@manchester.ac.uk ama wax u qor The Information Governance Office, Christie Building, The University of Manchester, Oxford Road, M13 9PL ee Jaamicadda waxaanan kugu hagi doonnaa habka aad u adeegsanayso xuquuqdaada

Waxaad sidoo kale xaq u leedahay inaad u dacwooto Xafiiska Wakiilka Warfaafinta cabashooyinka la xiriira macluumaadkaaga shaqsiyeed ee lagu garan karo Tel 0303 123 1113

Faahfaahinta xiriirka

Haddii aad jeclaan lahayd inay ka qayb qaataan baadhitaanka, waxaad ka heli kartaa baadhitaanka diiwaangelinta halkan: https://surveys.ipsosinteractive.com/surveys/?p=jZt9VfdUz0lpKjKSVU19dx7XQulvdp%2bHMIFDym5IOKg3UL40L4YcPmzT3Zhgs2XRRcsH3f9aYbvF9XZJqv9RXf%2f2dlVd2Xvs3qZdmM5qxS4%3d&id=partxtest]

Haddii aad wax su'aalo ah ka qabtid daraasadda, waxaad booqan kartaa bogga macluumaadka u gaarka ah ee Ipsos MORI:
evenssurveyinfo.ipsos-mori.com

Haddii aadan jawaabta su'aalahaaga ka heli karin bogga macluumaadka Ipsos MORI ama aad jeceshahay inaad kaga qayb gasho taleefan, markaa waxaad toos ula xiriiri kartaa Ipsos MORI adoo adeegsanaya faahfaahinta xiriirka hoose:

- Wixii weydiimo dheeraad ah oo aan looga jawaabin bogga macluumaadka Ipsos MORI fadlan emayl:**evenssurvey@ipsos-mori.com**

- Si aad uga qaybqaadato ama u weydiiso macluumaad dheeraad ah ee taleefanka **oo af ingiriisi ah** fadlan wac nambarka taleefanka ee soo socda: **0808 1296800** (kani waa adeeg cod bixin ah, fadlan dhaaf faahfaahinta xiriirkaaga oo qof ayaa dib kuu soo wici doona si uu kaaga caawiyo ka jawaabida su'aashaada ama sameeyo sahan diiwaangelinta si loo arko haddii aad u-qalanto sahanka ugu muhiimsan).

- Si aad uga qaybqaadato ama u weydiiso macluumaad dheeraad ah ee taleefanka **mid ka mid ah luqadaha hoos ku xusan**, fadlan wac mid ka mid ah lambarada taleefanka ee bilaashka ah (kani waa adeeg dib u helid cod ah, fadlan dhaaf faahfaahinta xiriirkaaga oo qof ayaa dib kuugu soo wici doona si uu kaaga caawiyo ka jawaabista su'aashaada ama sameeyo sahan diiwaangelinta si loo arko haddii aad u-qalanto sahanka ugu muhiimsan)

Luuqadda	Lambarka taleefanka bilaashka ah
Carabi	0800 470 2983
Bengaali	0800 470 2965
Shiineys	0800 470 2986
Gujarati	0800 470 2989
Boolish	0800 470 2987
Boortaqiis	0800 470 2977
Punjabi: Gurmukhi	0800 470 2978
Punjabi: Shahmukhi	0800 470 2979
Romaani	0800 470 2980
Soomaali	0800 470 2981
Turki	0800 470 2982
Urdu	0800 470 2984
Welsh	0800 470 2985

Waxa kale oo jira tiro ururo ah oo halkan ku taxan oo aad kala xiriiri karto si aad u hesho taageero:

AGE UK

Khadadka talobixinta ee 'Age UK' waa adeeg taleefan qaran oo bilaash ah oo qarsoodi ah oo loogu talagalay dadka waayeelka ah, qoysaskooda, asxaabtooda, daryeelayaashooda, iyo xirfadlayaashooda. Kooxda ayaa ku siin doonta macluumaad la isku halleyn karo oo casri ah waxayna kaa caawin doonaan inaad hesho marinka talooyinka aad u baahan tahay.

Adeegga talo bixinta ee khuseeya lacagta, daryeelka, caafimaadka, guriyeynta, ama mowduuc kale oo talo bixin ah ayaa lala xiriiri karaa maalin kasta oo sanadka ah, inta u dhexeysa 8da subaxnimo ilaa 7da fiidnimo.

Teleephonka: 0800 055 6112

Bogga: https://www.ageuk.org.uk/

Talada Muwaadiniinta

Shabakad samafal oo madaxbanaan oo talo qarsoodi ah ka bixisa khadka tooska ah, telefoonka iyo shaqsi ahaanba bilaash. Waxay ku siin karaan talo ku saabsan dheefaha, shaqada, deynta, guriyeynta, qoyska, socdaalka, iyo caafimaadka.

Khadka Talada(England): 03444 111 444

Khadka Talada (Wales): 03444 77 20 20

Khadka Talada (Iskotland): 0800 028 1456

Khadadka oo dhan waxaa la heli karaa 9ka subaxnimo ilaa 5ta galabnimo, Isniinta ilaa Jimcaha.

Bogga: https://www.citizensadvice.org.uk/ (England & Wales)

Bogga: https://www.cas.org.uk/ (Iskotland)

Chat wuxuu kuu ogolaanayaa inaad kula hadasho lataliye tababaran khadka tooska ah. Waxaad awoodi kartaa:

- Kala hadal dhibaatada deynta.https://www.citizensadvice.org.uk/about-us/contact-us/contact-us/chat-service-money-and-debt/ Caawinta badanaa waxaa la heli karaa inta u dhexeysa 8da subaxnimo ilaa 7da fiidnimo, Isniinta ilaa Jimcaha

- Kala hadal nooc kasta oo dhibaato ah https://www.citizensadvice.org.uk/about-us/contact-us/contact-us/web-chat-service/ Caawinta badanaa waxaa la heli karaa inta u dhexeysa 10ka subaxnimo ilaa 4ta galabnimo, Isniinta ilaa Jimcaha

Kovid-19 Gargaarka La wadaago

Waxaa jira kooxo maxalli ah oo ku jira deegaankaaga si ay u taageeraan bulshooyinka ay dhibaatadu ka haysato Kovid-19 awgood

Booqo: https://covidmutualaid.org/ oo geli aaggaaga ama lambarka boostada si aad u hesho kooxdaada kuugu dhow ee taageerada ah.

Daryeelka Tacsiyeed

Khadka Caawinta Qaranka ee Bilaashka ah ee Daryeelka Murugada waxaa ka shaqeeya mutadawiciin murugaysan, oo siiya taageero shucuureed qof kasta oo ay waxyeeladu soo gaadhay.

Telefoon: 0844 477 9400 (Isniinta ilaa Jimcaha, 9ka subaxnimo ilaa 5ta galabnimo)

Bogga: https://www.cruse.org.uk

Adeegga Talobixinta La-talinta Sinnaanta (EASS)

EASS waxay leedahay khad gargaar oo ay ku siiso macluumaad iyo hagitaan ku saabsan takoorka iyo arrimaha xuquuqda aadanaha. Adeeggu waa bilaash oo si buuxda ayaa looga heli karaa telefoonka, emaylka, fakiska, boostada, xiriiriyaha fiidiyowga ee loogu talagalay kuwa doonaya adeegsiga BSL waxayna leeyihiin marin u helidda adeegyo u doodid kuwa qaba caafimaadka dhimirka iyo dadka naafada ka ah waxbarashada. Chat ayaa sidoo kale dhowaan la furi doonaa.

Waqtiyada Furitaanka: Isniinta ilaa Jimcaha 9ka subaxnimo ilaa 7da habeenimo iyo Sabtida 10 subaxnimo - 2da duhurnimo.

Khadka Talada: 0808 800 0082

Telefoonka qoraalka: 0808 800 0084

Bogga: http://www.equalityadvisoryservice.com/

MIND

MIND oo ah olole talo iyo taageero bixiya si loo xoojiyo qof kasta oo ay la soo dersto dhibaato caafimaad maskaxda. Waxay u ololeeyaan hagaajinta adeegyada, kor u qaadista wacyiga, iyo kobcinta fahamka.

Waxaad la xiriiri kartaa MIND-da 'Infoline', 9ka subaxnimo ilaa 6da habeeno, Isniinta ilaa Jimcaha (marka laga reebo Fasaxyada Bangiga): 0300 123 3393

emaylka: info@mind.org.uk

Bogga: https://www.mind.org.uk/

Qoraal: 86463

Khadka amaahda Qaranka

Waxay leeyahiin rikoodh la xaqiijiyay oo ah inay khibrad ka badan 25 sano inay bixiyaan talo bixin deyn. Waxay ballanqaadayaan inay bixiyaan lataliyeyaal deyn khibrad leh oo taageera oo loo tababbaray heer sare.

Wac talo bixin deyn oo bilaash ah 0808 808 4000 Isniinta ilaa Jimcaha, 9ka subaxnimo - 8 habeenimo iyo Sabtida 9.30 subaxnimo - 1 galabnimo

Bogga: https://www.nationaldebtline.org/

Hoyga Magangelinta

Khad 24 saacadood oo caawimaad ah oo loogu talagalay qof kasta oo la kulma xadgudubka guriga:

Telefoonka: 0808 2000 247

Bogga: https://www.refuge.org.uk/

Waxay sidoo kale leeyihiin ilo kala duwan oo dijitaal ah oo laga heli karo www.refuge.org.uk iyowww.nationaldahelpine.org.uk

Samaritans

Taageero qarsoodi ah oo loogu talagalay dadka dareemo murugo ama rajo beel:

Telefoon: 116 123 (Khad 24 saacadood oo lacag la'aan ah)

E-mayl: jo@samaritans.org

Bogga: www.samaritans.org.uk

Stop Hate UK

Stop Hate UK waa hay'ad samafal oo bixisa taageero madax-bannaan oo qarsoodi ah dadka ay saameeyeen Dembiyada Nacaybka. Waxay bixiyaan dambi nacayb qarsoodi ah adeegyada warbixinta gudaha meela kala duwan oo Boqortooyada Midowday ah, oo ay ku jiraan khad gargaar oo 24-saac ah. Fadlan hubi liiska meelaha si taxaddar leh kahor intaadan wicin.

Bogga: www.stophateuk.org

24-saac khadka caawinta: 0800 138 1625

Fakis: 0113 341 0396
Qoraal: 07717 989 025

Emayl: talk@stophateuk.org

Taageerada Dhibanaha

Haddii dembi kugu saameeyo, waxay ku siin karaan taageero aad ugu baahan tahay inaad horay u socoto. Adeegyadu waa lacag la'aan, qarsoodi ah, oo ay heli karo qof kasta oo jooga England, Wales, ama Iskotland iyadoon loo eegin haddii dambiga la diinwaangeliyay iyo sida uu u dhacay ka hor.

Wac khadka taleefanka oo bilaash ah

08 08 16 89 111 (England & Wales, 24 saacadood maalintii)

0800 160 1985 (Iskotland, 8 subaxnimo ilaa 8 habeenimo)

Adeegga emayl ugu dir adoo adeegsanaya foomka tooska ah ee bogga:

https://www.victimsupport.org.uk/ (England & Wales)

https://victimsupport.scot/ (Iskotland)

Waad ku mahadsan tahay waqtigaaga.